# Sida loo furo koontada *Good To Go!*

Ka gal khadka tooska ah barta [www.MyGoodToGo.com](http://www.MyGoodToGo.com) oo riix badhanka cagaaran ee dhahaya "SIGN UP FOR AN ACCOUNT (SAMEE KOONTO)"




Boga xiga, riix badhanka guduudan ee dhahaya "CREATE A NEW ACCOUNT (SAMEE KOONTO CUSUB)"



## Boga “Account Access (Galitaanka Koontada)”

Dooro magaca aad ku isticmaalayso, lambarka sireedka ah iyo Lambarka Aqoonsiga Shakhsi ahaaneed (Personal Identification Number, PIN) oo afar-god ah.

Magacaagu aad isticaasho waa inuu isticmaalo ugu yaraan lix xaraf, waana inuu ka kooban yahay xarfo, tirooyin ama ciwaanka iimaylka oo sax ah.

Lambar sireedkaagu waa inuu isticmaalo:

- Ugu yaraan sideed xaraf
- Ugu yaraan hal xaraf oo weyn
- Ugu yaraan hal xaraf oo yar
- Ugu yaraan hal lambar (0-9)




Markaad doorato magaca lagu isticmaale sax ah, lambar sireedka iyo lambarka aqoonsiga (PIN) riix badhanka NEXT (XIGA) ee boga hoose.

WSDOT Good To Go!™

# Boga "Customer Information (Macluumaadka Macmiilka)"

Gali macluumaadka saxda ah dhamaan meelaha foomamka lagu calaamadeeyay calaamad xidigta (*)

Waa inaad galisaa magacaagii hore iyo midka u dambeeya, ciwaanka iimaylka oo sax ah iyo lambar telefoon oo sax ah. Riix sanduuqa dhahaya "Send me text message alerts (I soo dir fariin qoraaleed digniin)" haddii aad rabto in aad hesho digniino muhiim ah fariin qoraal ah.




Magaca u horeeya

Magaca u dambeeya

Iimaylka

Xarafka ugu horeeya magaca dhexe

Lambarka talefoonka

Kadib gali cinwaankaaga boostada:




Waxa laga yaabaa inay shaashad kusoo baxdo oo ku waydiiso inaad xaqiijiso ciwaankaga deegaanka sababtoo ah ma waafaqsana ciwaanka deegaanka United States Postal Service (USPS) aqoonsan yahay. Kaliya xaqiiji ciwaanka deegaanka ee saxda ah.




Kadibna riix badhanka NEXT (XIGA) ee ku yaala hoosta boga.

WSDOT Good To Go!™

# Boga "Vehicles (Gawaarida)"

Geli macluumaadka taarikadaada oo hubi inaad ka doorato nooca saxan ee ku haboon liistada hoos u dhaadhacda.

Naanaysta gaariga




Haddii aad leedahay taariko shakhsi ahaaneed, hubi inaad riixdo sanduuqa dhahaya "This is a personalized license plate (Kani waa taariko shakhsi ahaaneed)"



Kadibna gali lambarkaaga taarikada adiga oo isticmaalaya liistada soo socda ee liistada hoos u dhaadhacda geli macluumaadka gaarigaaga.




Lambarka Ruqsada Taarikada

Hadii gaariga samayntiisa iyo naqshada aanay ku jirin liistada hoos u dhaadhacda, riix sanduuqa dhahaya "This is a non-passenger vehicle (Kani waa gaari aan rakaab ahayn)" kaas oo kuu ogolaan doona inaad ku qorto samaynta iyo qaabka halkii aad isticmaali lahayd liistada la bixiyay.




Kadib markaad hubiso dhamaan macluumaadkaaga inay sax yihiin riix badhanka NEXT (XIGA) ee boga hoose.

## Boga “Passes (Kaararka Jid Marka)”

Waxaad haysataa ikhtiyaarka ah inaad ka dhigto mid shaqaynaya kaarkaagii hore ama aad iibsato kaarka jid mar. Waxaa jira faa'iidooyin kala duwan ee kaar jid mar kasta:




Kaarka jid marka ah ee istiikarka ah waa $5 oo lagu daray canshuur waana ikhtiyaarka ugu caansan darawalada aan u baahnayn inay ku baabuurka ku dhex wataan jidadka I-405 ama Haadadka Saxmada Badan (High-Occupancy Toll, HOT) SR 167. Waxay kuu ogolaanaysaa inaad bixiso kharshka jid marka dhamaan wadooyinka khidmadaha lagu maro ee Washington. Mar hadii baaska aad ku dhajiso muraayadaada hore, ka fujinteedu waxay burburin doontaa baaska.

Flex Pass waa $15 oo lagu daray cashuur wuxuuna kuu ogolaanayaa inaad baabuur wadato lacag la'aan haadadka khidmada lagu maro ee I-405 iyo haadadka SR 167 HOT marka aad dad kugu filan gaarigaaga ku jirto. Waxay sidoo kale ka shaqaysaa in lagu bixiyo dhamaan wadooyinka khidmadaha lagu maro ee Washington marka aadan haysan dad kugu filan oo aad baabuur dadweynaha.




Kaarka jid marka ee taarikada waa $12 oo lagu daray cashuur waana badalka darawalada leh muraayadaha hore ee xira calaamadaha u dhexeeya kaadhadhka iyo qalabka lacag bixinta. Hubi buug-gacmeedka mulkiilahaaga haddii aadan hubin haddii aad u baahan tahay kaarkan, sababtoo ah baabuur badan oo leh muraayadaha hore ee gaarka ah ayaa sidoo kale meel gaar ah ku leh muraayadda hore waxaad ku rakibi kartaa kaarka jid marka, wuuna shaqayn doonaa.

Kaadhka Baaskiilku waa $8 oo lagu daray cashuurta. Mootooyinku waxay markasta isticmaali karaan haadadka degdega ah ee I-405 iyo SR 167 HOT haadadka bilaashka ah, laakiin waxay bixin doonaan lacag marka la isticmaalayo Tacoma Narrows Bridge, SR 520 bridge iyo SR 99 tunnel. Marka kaarka jid marka uu ku dhajiso baaskiilkaaga, ka saarista ayaa burburin doonta kaarka jid marka.

Isticmaal liistada hoos u dhaadhacda ee ku xigta "Qty (Tirada)" ee kaar kasta si aad u doorato inta nooc kasta oo aad rabto inaad iibsato.




Uma baahnid inaad iibsatid wax kaarar jid mar ah, laakiin waxaad kaydin doontaa lacag safar kasta haddii kaarka jid marka lagu rakibay gaarigaaga. Kaarka jid marka la'aantiis, waxaad bixin doontaa 25- senti oo dheeraad ah safar kasta.

Markaad dooratid, u dag dhanka hoose ee boga, oo iix badhanka NEXT (XIGA).

# Boga “How to pay (Sida loo bixiyo lacagta)”

Waxaad u baahan tahay inaad doorato nooca koontadaada:

Horaan lacagta loo bixiyay: Horaan u bixi $30 marka aad furto koontadaada si aad u daboosho lacagaha jid marka ee mustaqbalka. Marka haraaga koontadaada uu hoos u dhaco, si toos ah ayaa lacag loo soo galinaya kaarka deynta. Ama waxaad dooran kartaa maalmo gaar ah oo bisha ah si aad koontadaada ugu buuxiso xawilaada elegtaroonig ah.

Pay As You Go: Kadib markaad baabuur wadato waxaa si toos ah loogu dalacayaa kaarka deynta laba jeer bishii. Looma baahna haraaga lacagta horaan loo bixiyay.




**<u>Hadii aad dooratay Pay As You Go</u>** waxaad riixi kartaa NEXT (XIGA) oo aad tagi kartaa boga dib u eegista iyo Lacag Bixinta.

**<u>Haddii aad dooratay Kaarka Lacagtiisa Horaan Loo Bixiyay</u>** waxaad markaas u baahan doontaa inaad doorato habka lacag bixinta - kaarka deynta ama xawilaada elegtaroonig ah.

Ku bixinta xawilaada eletroonig ah (Automated Clearing House, ACH), koontadaada waxa lagu shuba laba jeer bishii si loo ilaaliyo haraaga ugu yar. Haddii haraagaagu uu ka hooseeyo $0 kahor taariikhda dib ugu shubitaanka lacagta ee horay loo dejiyay oo aad safaro lacag ah samayso, waxa laga yaabaa in aad ku hesho biilka lacagta boostada. Haddii aad doorbidayso in koontadaada dib loogu shubo lacag ka hor inta aanu baaqigaagu ka hoos dhicin $0 waxaad u baahan doontaa inaad dooratid "pay with a credit card (ku bixi kaarka deynta)".




Waxa aad ku dari kartaa lacag badan koontadaada marka aad furto adiga oo ku qoraya qadar gudaha foomka qeybta hoos lagu sawiray:




**<u>Haddii aad dooratay Xawilaada Elegtarooniga ah</u>** waxaad haysataa ikhtiyaarka ah inaad doorato inaad haysato koontadaada, si toos ah dib ugu shubato.

Riix sanduuqa "Refill my account automatically (Si toos ah uu shubo koontadayda)" haddii aad rabto in ishaada lacag bixinta lagu soo dallaco qadar go'an si aad dib ugu buuxiso koontadayda *Good To Go!* marka hadhaagu hoos uga dhaco qadar go'an. Qeybta foomka si toos ah uga hooseeya sanduuqa ku geli qadarka aad rabto in lagu daro akoonkaaga *Good To Go!* mar kasta. Qadarka dib u buuxintu kama yaraan karo $30.




Kadibna waxaad haysataa ikhtiyaar aad u dooratid laba maalmood bishii in isha lacag bixinta si toos ah loogu dalaci doono si aad ugu buuxiso akoonkaaga isla haraaga aad dooratay.




Markaad dooratid waxaad usoo dagi kartaa dhinaca hoose ee boga oo riix badhanka XIGA (NEXT).

**<u>Haddii aad dooratay kaarka deynta,</u>** waxaa sidoo kale aad dooran kartaa in koonktadaada si toos ah ugu shubato lacagaha.

WSDOT Good To Go!™

**How do you want to pay for tolls?**

You'll pay the same low toll rate with a *Good To Go!* pass no matter which payment option you choose.

◉ **Pre-Paid**
Pre-pay $30 when you open your account to cover future tolls. When your account balance gets low, it is automatically refilled via credit card. Or you can choose specific days of the month to refill the account via electronic checks.

○ **Pay As You Go**
After you drive, tolls are automatically charged to your credit card twice a month. No pre-paid balance required.

**Payment method**

◉ Credit card

○ Electronic check

**Additional deposit amount**

$ ______________ (optional)

**Auto Pay options**

☑ Refill my account automatically
When your account reaches a low balance of $8, your credit or debit card is automatically billed $30 to replenish your account. These are minimum required amounts to keep your account active.

Markaad dooratid waxaad usoo dagi kartaa dhinaca hoose ee boga oo riix badhanka NEXT (XIGA).

Marka koontadaada ay gaarto haraaga ka hooseya $8, kaarka daynta ama kaarka lacag ku shubashada ayaa si toos ah loo dalacayaa $30 si loogu buuxiyo koontadaada. Kuwani waa qadarka ugu yar ee loo baahan yahay si koontadaada looga dhigo mid shaqaynaysa.

# Boga “Review & Pay (Dib u eeg oo Bixi)”

Geli macluumaadkaaga lacag bixinta.

**<u>Hadii aad u dooratay kaarka daynta</u>** sida habka lacag bixinta ee bogii hore waxaad u baahan doontaa inaad geliso macluumaadka kaarkaaga, ciwaanka deegaanka biilasha iyo ciwaanka dhoofinta.




Magaca qofka kaarka haysta

Lambarka kaarka deynta

Koodhka amaanka

Wakhtiga dhicitaanka (BISHASANADKA)

**<u>Hadii aad u doorataay Diritaanka Lacag Elektarooniga ah</u>** habkaaga lacag bixinta, waxaad u baahan doontaa inaad geliso macluumaadka koontadaada bangiga




Magaca koontada

Lambarka tixraaca

Lambarka koontada

Magaca Ururka Dhaqaalaha

WSDOT Good To Go!™

Markaa waxaad u baahan tahay inaad dib u eegto oo aad ogolaato Shuruudaha iyo Xadiidaha iyo Shuruudaha ACH. [Labada shuruudoodba waxay ku diyaarsan yihiin PDF ahaan ee websaytka Washington State Department of Transportation (WSDOT)] oo ku qoran Carabi, Shiinay, Luuqada Korea, Luuqada Ruushka, Soomaali, Isbaanish iyo Fiyatnaamiis. Ogow shuruudaha adiga oo riixaya sanduuqa dhahaya "I agree to the Terms and Conditions (Waan aqbalay Shuruudaha)"




Kadib markaad ogolaato waxaad u baahan tahay inaad dib u eegto dhamaan macluumaadka koontadaada cusub ee dhinaca midig ee boga si aad u hubiso in macluumaadkaaga xiriirka iyo macluumaadka gaariga ay yihiin kuwo sax ah.

Kadibna riix badhanka guduudka khafiifka ah ee PAY NOW (HADA BIXI) ee ku yaal xaga hoose ee boga.

Hambalyo! Waxaad furtay koontada *Good To Go!* Waxaa lagu gayn doonaa boga qiraalka in koontada la furay oo ay ku jiraan lambarka xaqiijinta iyo aqoonsigaaga macmiilka. Macluumaadkan waxaa sidoo kale loo diri doonaa ciwaanka iimaylka ee aad isticmaashay markii aad furaysay koontada.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, aad qabto cilado la xiriira furitaanka koontadaada, ama aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah, fadlan wac adeega macaamiisha 1-866-936-8246. Adeegyada turjumaada waxaad ku heli kartaa lacag la'aan.